




# Home Link - Somali



## Home Links Xiriirinta Guriga Cutubka 5aad: Hoosaska iyo Humaagyada: Isbuuca 2aad

Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkani wuxuu cunuggaagu baran doonaa hoosaska iyo humaagyada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahaan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_

<p style="text-align: center;"><b><u>Qorista</u></b></p> <p><b>Wada Qaada:</b> Kani waa gabay ilmahaagu ka bartay dugsiga.</p> <p style="text-align: center;"><b>The Little Turtle</b></p> <p>There was a little turtle. He lived in a box. He swam in a puddle. He climbed on the rocks. He snapped at a mosquito. He snapped at a flea. He snapped at a minnow. And he snapped at me. He caught the mosquito. He caught the flea. He caught the minnow. But he didn't catch me.</p>	<p style="text-align: center;"><b><u>Luuqadda</u></b></p> <p><b>Igu Dayasho:</b> (La xiriirta <i>Play with Me</i>, <i>Raccoon on His Own</i>, iyo <i>Kitten's First Full Moon</i>)</p> <p>La fiiri cunugaaga humaaggiina muraayadda oo fiiri sida muuqaalku ula socdo jidhkiinna. Iska soo hor jeesta midba midka kale. Si tartiib ah u dhaqaaji jirkaada kuna dhiiri geli ilmahaaga inuu kugu daydo, ama "sida muraayado", kuula dhaqdhaqaaqo kadibna is beddela doorkiina (markiisa).</p> <p><b>Bilowga Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Maxaad aragtaa?</li> <li>● Maxaa dhacaya haddii aan si degdeg ah u dhaqaaqi lahaa?</li> <li>● Sidee bay isku mid tahay ama kaga duwan tahay marka aan si tartiib ah u soconno?</li> </ul> <p><b>Ereyada Loo Isticmaalo inta Lagu Jiro Wadahadalka:</b> <i>ku dayasho, muraayada, humaag sameyn, humaag, muuqaal</i></p>
<p style="text-align: center;"><b><u>Hadal iyo Akhris Wadajir Ah</u></b> <b>(20 daqiiqadood)</b></p> <p><b>Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay?</li> <li>● Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?</li> <li>● Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?</li> </ul>	<p style="text-align: center;"><b><u>Daahfur</u></b></p> <p><b>Cutubka Humaagga:</b> (La xiriirta <i>Play with Me</i>, <i>Raccoon on His Own</i>, iyo <i>Kitten's First Full Moon</i>)</p> <p>U sheeg cunuggaaga inaad ku socotid ugaadhsi humaag (ha ahaato banaanka ama gudaha gurigaaga). Ku qaado sawirro taleefankaaga markaad aragto walxo humaag sameeya.</p> <p><b>Bilowga Wadahadalka:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>● Maxaa abuuray humaagyadan?</li> <li>● Halkee ayaan ka helnay humaagyada ugu badan?</li> </ul> <p><b>Ereyada loo Isticmaalo inta Lagu Jiro Wadahadalka:</b> <i>waxaa ka mid ah humaag, aan humaag sameyn, dhalaala, caajis, dusha sare, muuqaal</i></p>

## Xisaab

### **Isbarbardhigidda Awoodaha:**

Soo ururso weelal leh cabbir iyo qaabab kala duwan sida koobabka, bowdada, weelasha kaydka, iyo dhalada biyaha. Samee xeero ama baaqli biyo ah oo dibedda dhig ama dul sare oo la qoyn karo. Ku casuum ilmahaaga inuu sahamiyo weelasha, oo is barbardhigo muggooda isagoo biyo ka shubaya midba mar.

### **Bilowga Wadahadalka:**

- Sheygee ayay ku jiraan inta ugu badan / ugu yar oo biyo ah? Maxaad sidaa ugu maleyneysaa?
- Imisa ah \_\_\_\_\_ ku qaadataa in la buuxiyo \_\_\_\_\_?

## Diiwaanka Akhrinta

Calaamadee maalin kasta adiga iyo cunugaaga aad sheeko wada akhrisaan. Buugaagtu waxay noqon karaan Af Ingiriis ama luuqada gurigaaga. Booqo Maktabadda Dadweynaha Boston saad u hesho buugaag wanaagsan oo ku saabsan hoosaska iyo humaagyada.

Isniin \_\_\_\_\_ Talaado \_\_\_\_\_ Arbaco \_\_\_\_\_ Khamiis \_\_\_\_\_ Jimco \_\_\_\_\_ Sabti \_\_\_\_\_ Axad \_\_\_\_\_

### **Buugaqa aan ku akhrino dugsiga:**

*Kitten's First Full Moon*  
oo uu qoray Kevin Henkes

### **Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:**

*Shadows and Reflections*  
oo ay qoray Tana Hobin

## Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Humaaggu** waa sawir ay sameeyeen waxa dhalaala."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Sidee ayuu dabacaddeeyuhu dareemay markuu arkay humaaggiisa?"